

# Yaraynta Halista siinta lacag – dheeraad ah



## Reducing the Risk of Overpayment—Somali

Siinta lacag dheerada ee family Tax Benefit Part B (lacagta cashuurta Qoyska Qaybta A), Family Tax benefit Part B (Lacagta Cashuurta qoyska Qaybta B) ama Child Care Benefit (Lacagta Xanaanada Carruurta) (oo ah ujrooyinka la dhimay) waxay keeni karaan dhibaato hase yeeshee waxaa muhiim ah in la xasuusto inaysan ahayn dacwad khalad samayn ah.

Siinta lacagta dheeraadka ahi waxay badanaa dhacdaa marka dadku hoos u dhigaan dakhligooda. Qoysasku waxaa laga yaabaa inay hellaan dakhli dheeraad ah inta sanad maaliyadeedka lagu jiro sababtoo ah, tusaale, qof ayaa helay shaqo mushahar sarre leh, isbedelo ka dhacay lacagihii taagerida ilmaha, shaqayn waqti dheeraad ah, boonas ama xubin kale oo qoyska ah oo shaqo helay.

### Halis ayaad ugu jirtaa in lagu siiyo lacag dheeraad ah haddii qoyskaagu:

- aad qaadata inta u dhexaysa \$42,000 iyo 61,000; **ama**
- dakhligaagu dhan yahay \$94,000 ama ka badan; **ama**
- u ku soo galo dakhli dhan \$140,000 ama ka badan; **ama**
- helo wax ka badan dakhli hal waalid oo shaqeyta; **ama**
- dakhligii oo isbedelay sababtoo ah kaltanka shaqada oo aan joogto ahayn, shaqayn waqti dheeraad ah ama boonas; **ama**
- helo dakhli ay adag tahay in la qiyaaso sababtoo ah waxaad tahay shaqaale mar-dhac ah, waxaadna ku shaqaysaa kumishan ama kunturaad, ama waxaad heshay boonas ka yimid lacag bixinta shaqo-ka-saarida; **ama**
- dakhli ka yimid ganacsi ama shaqo iskaa ah; ama ka badan; **ama**
- taas waxaa ka mid noqon kara ilma ay soo gasho \$12,287 ama ka badan.

Dhamaan dakhliga waa mid waafaqsan 01/07/2008.

Siinta lacag dheeraad ah waxay kaloo dhacdaa markay isbedelaan duruufaha qoyska oo aan loo sheegin Family Assistance Office (Xafiiska Caawimaada Qoyska).

### Sidee baan u yarayn karaa halista lacag-dheeraad ah siinta?

#### Bal eeg in sanadkii lagu siiyo

Lacag-bixinta sanadka ee Family Tax Benefit (lacagta cashuurta ee Qoyska) waxay si weyn u yaraysaa halista in lagu siiyo lacag dheeraad ah. Waxaad kaloo qaadan kartaa qiyaasta asaasiga ah ee Family Tax Benefit Part A (Lacagta Cashuurta Qoyska Qaybta A) inta soo hartana marka uu sanad maaliyadeedku dhamaado taas ayaa yaraysa halista in lacag dheeraad ah lagu siiyo.

### Haddii lacag-bixinta todobaadlaha ah ee Family Tax Benefit iyo Child Care Benefit oo ah ujrooyinka la dhimay ay ku haboon yihiin qoyskaaga, waxaad u baahan tahay inaad:

#### Hubiso in qiyaasta dakhligaagu sax yahay

Isbedelada ku dhici kara qoyska oo dhan, waxaad u baahan tahay inaad la socoto dakhligaaga aadna u sheegto Family Assistance Office (Xafiiska Caawimada Qoyska) inuu la socdo isbedel kasta oo ka dhaca qiyaasida dakhligaaga. Haddii dakhligaagii isbedelo, waxaad u baahan tahay wax-dheefyo dheeraad ah, ama waxaa laga yaabaa inaad qaadata in saaid ah. Haddii aad qaadata in ka siyaado ah wixii ay ahayd inaad qaadata, waxaa lagaa codsan karaa inaad soo celiso marka uu dhamaado sanad maaliyadeedku.

We speak your language ☎ 13 1202

[www.familyassist.gov.au](http://www.familyassist.gov.au)



**Australian Government**  
**Family Assistance Office**

# Reducing the Risk of Overpayment—Somali

Siyaada bixinta Family Tax Benefit iyo Child Care Benefit waxaa laga yaabaa in laga soo celiyo lacagta Family Tax Benefit taas oo ay ku jirto lacagta lagu darayo dhamaadka sanada. Lacagta siyaadada ah ee Family Tax Benefit ayaa laga yaabaa in laga soo celiyo lacagta cashuurta. Waa muhiim in adiga iyo xaaskaagu aad soo xeraysaan cashuurtiina (ama aad u sheegtaan Family Assistance Office haddii aydin u baahnayn inaad soo xeraysaan cashuurtiina). Dhamaan lacagta siyaadada loo bixiyey waa in si buuxda loo bixiyo.

## Haddii wax isbedelaan horay wax uga qabo

Tani waxay ka mid tahay waxyaallaha ugu muhiimsan oo aad u baahan tahay inaad samayso si aad uga caawiso Family Assistance Office (Xafiiska Caawimaada Qoyska) inuu ku siiyo lacagta saxda ah.

## Halkaan waxaa ku qoran liiska waxyaallaha kugu baraarujin kara inaad wacdo Family Assistance Office:

- Ay isbedelo ku dhacaan dakhliga qoyska, shaqo cusub, ku noqosho shaqadii hore, shaqo ka bixis, saacado dheeraad ah, kordhinta mushaharka, faaiidadii ganacsiga oo korortay, saamiga maalgelinta laga hellay, waxyaallahaas oo dhami waxay isbedeli ku samayn karaan intay le'eg tahay lacagta lagu siin karo.
- Isbedel ku dhaca xaallada guurkaaga.
- Haddii ilmo soo galo ama ka baxo daryeelkaaga.
- Ay isbedesho lacag-bixintii taageerida ilmaha.
- Haddii aad ka tagto Australia (oo ay ku jiraan safarada iyo fasaxyada gaaban).
- Isbedel ku dhaco qorshihii daryeelka ilmahaaga.
- Haddii ilmuhu ka tago dugsiga.
- Haddii xanaanadii la wadaagay isbedesho.
- Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu ka weyn 16 sanadood u hellayo \$12,287 ama ka badan.
- Uu isbedelo cinwaankaagii.

## Si aad u ogaysiiso Xafiiska Family Assistance Office wixii kasta oo isbedello ah oo dhaca ama wixii macluumaad dheeraad ah:

- Ka wac Family Assistance Office (Xafiiska Caawimaada Qoyska) telefoonka **13 1202** inta u dhexaysa 8.00 subaxii ilaa 5.00 casarkii (EST) Isniinta ilaa Jimcaha wixii macluumaad ah ee luqada Soomaaliga ku qoran.
- Ka eeg websaytka ah [www.familyassist.gov.au](http://www.familyassist.gov.au)
- Booqo xafiiska kuugu dhow ee Xafiiska Caawimada Qoyska (Family Assistance Office) oo ku yaalla Xafisyada Medicare Australia, Xarumaha Adeega Macmiilaha Centrelink iyo dukaamada Xafiiska Cashuuraha Australiya (Australian Taxation Office shopfronts).